

IIB MA GALO



**FAAFINTA**

الرسمية



**RASMIGA AH**

الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad

Muqdisho, 25 Feb. 1979 L. 1R2

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qortitaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xaafiska Sanshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

#### S H A R C I

SHARCI L. 2 ee 14 Jen. 79. Wax ka beddelid Sharciga Dhismaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha Bogga 109

SHARCI. L. 3 ee 4 Feb. 79, Sharciga Horumarinta Dhulka Daaqa:- ” 114

Law N. 3 4th feb. 79 Decrees this act as range development and management. ” 123

### QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 12 ee 26 Dis. 78, Dallacaad Shaqaale ” 132

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 13 ee 9 Jen. 79, ku maamuusid Billad lacag ah oo Kacaan-nimo Jaalle Takhtar Daahir Nuur Raafi ” 139

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 14 ee 20 Jen.  
79, Guddoonsiin Jaallayaasha Billado lacag  
ah oo Kacaannimo » 140

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 15 ee 23 Jen.  
79, ku maamuusid Billad lacag ah Jaalle Xu-  
seen Cabdulle Deerow » 141

QAYBTA SADEXAAD  
TALOOPYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO LA MID AH.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, ee  
22.2.79, lumid Jeeg. L. 23198 ku qoran tahay  
Sh. So. 1.350 uu leeyahay Ciise Nuur Yuusuf  
L. 108 » 142

Ogeysiis Shir Saamiley Warshadda Kiimikadda  
Socmaaliyeed (BAYL) L. 109 » 143  
Ogeysiis Shir Saamiley Warshadda Saabuunta qubeyska  
iyo Mariska L. 110

Q A L A D — B I X I N

FAAFINTA RASMIGA AH ee Lam. yahay 2 ee 1dii Febraa-  
yo 1979 Bog. 106 Qaybta labaad ku qoran yahay Go'aanka Max.  
kamadda Gobolka Banaadir Jeeg. Lam. War. 357766; waa in  
loo akhriyaa sidatan Jeeg. Wareega L. 257766.

QAYBTA KOOWAAD  
SHARCI

SHARCI L. 2 ee 14 Jen. 1979 wax ka beddelid Sahrciga Dhis-  
maha Guddiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha  
MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tii 3aad ee Ka-  
caanka 21 Otkoobar 1969

ISAGOO ARKAY: Sharciyada L. 17, 18, iyo 19 ee 1 Luulyo 1976  
ee Maamulka Guud ee Dowladda oo loo wareejiyey Xisbiga  
Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed:-

ISAGOO ARKAY: Sharciga L. 19 ee 6 Abriil 1978 oo lagu dhi-  
say Guddiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha

ISAGOO AQCONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in  
sharciga Dhismaha Guddiga wax laga beddelaa laguna kor-  
dhiyaa si uu maamulkiisa iyo awoodiisa uu noqdo mid lagu  
fulinayo himilooyinka loo dhisay Guddigaa;

ISAGOO TIXGELIYEEY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee  
X.H.K.S. iyo kaa Golaha Wasiiradda

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Guddiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha oo  
lagu dhisay sharciga l. 19 ee 19 Abriil waxaa la oran doonaa  
«GUDDIGA IIBKA QARANKA & QANDARAASYADA DOW-  
LADDA» hadda ka dibna waxaa loo aqoonsan doona «GUD-  
DIGA»

Qodobka 2aad

Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dowladda waa  
Hay'ada sare oo raacsan Madaxtooyada

Qodobka 3aad

Guddiga Xaruntiisa waa magaala madaxda Muqdishu.

Guddiga wuxuu yeelan karaa Xafiisyo ama laamo Gobolla-  
do iyo Degmooyinka uu ka kooban yahay Dalka haddii loo baa-  
do.

Qodobka 4aad

1) Go'aannada Guddiyada hoos ku tilmaaman iyo kaa Hay

'ada Rugta Ganacsiga ee la xiriira howlo sharciga u xilsaaraayo waxaa loo beddelay mid la talin u ah Hayada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda:-

Guddiyada kor ku xusan waxay kala yihiin:

- i - Guddiga Oggolaanshaha Lacagta Qalaad (Commissio ne valuta estera) oo lagu dhisay Sharciga L. 12 ee settembr 1964 ;
- ii - Guddiga Bixinta Ruqsadaha Beemushtarka (licensing Commity) oo lagu dhisay Keerka L. 264 ee 25 nofembre 1964 ;
- iii - Guddiyada Qandaraasyada oo ka dhisan Hay'adaha Dawladda.-

2) Habka ku dhaqanka xubinta seddexaad ee qodobkan waxaa amarro iyo talooyin ka bixin kara Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda:-

#### Qodobka 5aad

Hashiisyada Hayadaha Dawladda dhinac ka ah iyo Qandaraasyada ee oggolaanshahooda aan ka soo fulin Hayadaha Fara Golaha Dhexe ee X.H.K.S., Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. Golaha Wasiiradda iyo Guddiga Sare ee Dhaqaalaha lama diiwaan gelin karo haddii aan laga helin oggolaansho Hay'ada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda:-

#### Qodobka 6aad

1. Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiya ku-Xigeenka waxay ka tirsan yihiin Golaha Dhexe ee X.H.K.S. waxaana lagu magacaabi doonaa Xeerka Madaxweynaha J.D.S.

2 Guddiga wuxuu yeelanayaa laba aqoonyahan oo waa-yo aragnimo leh oo kala ah:

- i - Aqoonyahan xagga Bangiyada, Dhaqaalaha iyo Iibka;
- ii . Aqoonyahan xagga sharciyada

Aqoonyahannadaas ama «La-taliyayaashaas» heerkooda iyo dhaqaalahooduba waxaa lagu soo habeyn doonaa Xeer-Nidaamiye lagu faahfaahinayaa Sharciga Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda:-

3 - Guddiga wuxuu kaloo yeelanayaa Xoghaye Guud oo qaban doono Howlaha la xiriira Guddiga, habeynta iyo keydinta go'aanadooda iyo kaa maamulka shaqaalaha raacsan Guddiyada.

#### Qodobka Taad

Havadda Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda waxay ka kooban tahay:

- 1) — Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda
- 2) — Guddiga Fulinta

3) — Guddoomiyaha Guddiga

Qodobka 8aad

1) — Xubinaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Qanadaraasyada Dawladda

Guddigaa wuxuu ka kooban yahay Guddoomiyaha Guddiga, Guddoomiye ku-Xigeenka, xubnaha kalana waxay kala yihiin:

- Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Xubin
- Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga Xubin
- Guddoomiyaha Bankiga Dhexe Xubin
- Aqoonyahanka Xagga Bankiyada, Dhaq. & Iibka Xubin
- Aqoonyahanka Xagga Sharciyada Xubin
- Xoghaayaha Guud ee Guddiga Xubin (Xoghaye)

2) - Howsha iyo Xilka Guddiga :

- i - Guud ahaan waxay ka mas'uul yihiin dejinta siyaasadda guud ee la xiriira Iibka Qalaba kasta oo u baahdaan Hay'adaha Dawladda iyo maamulka la xiriira Qandaraasyada Hay'adaha Dawladda ;
- ii - Gaar ahaan waxay ka mas'uul yihiin fulinta howlaha lagu faahfaahiyay qod. 4aad ee Sharciga 1. 19 ee 4 Abriile 1978 iyo go'aan ka gaaridda la-xiriira :
  - a) - Oggolaanshah Lacagta Qalaad ;
  - b) - Bixinta Rugsadaha Beecmashtarka
  - c) - Oggolaanshaha Ruqsadaha Ganacsiga ee la siiyo shishisheeyaha ee Rugta Ganacsiga ;
  - d) - Oggolaanshaha kama dambaysta ee Qandaraasyada Dawladda.

3) - Awoodda Guddiga :

Guddiga waxay awood u leeyihiin :

- i) - In ay buriyaan Heshiis kasta ama Qandaraas kasta - inta aan la fulin haddii ay ka soo ifbaxaan xaalado lid ku ah dhaqaalaha iyo danaha guud ee Dawladda:-
- ii) - Howlaha fudud ee la xiriira Hayada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda u wakiishaan Guddiga Fulinta Hayada.

4) - Fadhiyada Guddiga :

Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda waxay yeelanayaan fadhiyo joogto ah oo isugu yeero Guddoomiyaha Guddiga mar alaale oo ay jiraan howlaha oo sharciyan u xilsaaray Guddiga :

1) - Xubnaha Guddiga Fulinta :

Qodobka 9aad

Xubnaha Guddiga Fulinta wuxuu ka kooban yahay Guddoomiyaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda, Guddoomiye ku-Xigeenka, labada aqoonyahan iyo Xoghayaha Guddiga oo lagu xusay qod. 6aad ee Sharciyan:-

2) - Howsha iyo xilka Guddiga Fulinta :

i) - Guud ahaan waxay ka masuul yihiin diyaarinta, baaritaanka howsha Hayada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda oo lagu xusay qod. 4aad ee Sharciya Dhismaha Guddiga 1. 19 ee 4 abriile 1978;

ii) - Gaar ahaan :

- Fulinta go'aanada ka soo baxa Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda;
  - ku dhaqanka sharciyada la xiriira oggolaanshaha lacagta Qalaad, bixinta ruqsadaha iyo kaa Qandaraasyada Dawladda;
  - Hirgelinta Siyaasadda ganacsiga iyo kaa dhaqaa-laha ee ka soo fula Golaha Dhexe ee X.H.K.S., Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S., Golaha Wasiirrada iyo Golaha Sare ee Dhaqaalaha
- Go'aan ka gaaridda howlaha loo wakiishay :

3) - Awacda Guddiga Fulinta :

Guddiga Fulinta waxay bixin karaan amarro iyo talooyin guud ee la xiriira xilka sharciga oo ay Maamusho Hayada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda :

4) - Fadhiyada Guddiga Fulinta :

Guddiga Fulinta waxay yeelanayaan fadhiyo joogto ah oo isagu yeeraayo Guddoomiyaha Guddiga, haddii uu maqan yahayna Guddoomiye ku-Xigeenka Guddiga si ay u fuliyaan howshooda joogtada ah :-

Qodobka 10aad

Guddoomiyaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda wuxuu matilayaa Hayada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda :-

Guddoomiyuhu wuxuu ka masuul yahay maamulka guud ee Hayada; Fulinta Himilooyinka Hayada; asluubta iyo daryeel ka shaqaalaha Hayada; maamulka lacagta. Waxaa kale oo ka masuul yahay fulinta go'aanada ka soo fula labada Guddi ee

Hay'ada, socodsiinta howsha Hay'ada iyo go'aannada saameeya Hayada ee ka soo baxa Hayadaha Sare isagoo mar waliba u hogaan samaaya Siyaasadda ganacsiga iyo ka dhaqaalaha ee Dalka.

Wuxuu leeyahay talo ka bixinta magacaabidda Aqoon yahannada, Xoghayaha Guud ee Guddiga oo lagu xusay Qod. 6aad ee sharcigan iyo saraakiisha Hayada :-

Aqoonyahannada iyo Xoghayaha Guddiga waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer u soo saaro Madaxweynaha isagoo dhegeystay tala soo jeedinta Guddoomiyaha Guddiga :-

Guddoomiyaha wuxuu awood u leeyahay inuu magacaabo khubaro oo Hayada kala Taliya wax alaale wixii u baahan yihiin oo aqoon ama farsamo gaar ah u baahan. Magacaabidda khubaradaas waxaa lala raacayaa habka sharciyada madaniga ay qorayaan, waxayna xaq u leeyihiin marka howshooda dhameeyaan in la siiyaa gunno howleed :-

—(indennita' della perizia condotta). Khubaradaas kama tirsanaan karaan shaqaalaha Hayada :-

Qodobka 11aad

Xuquuqda shaqaalaha Hayada waxaa xukumaaya sharciga Shaqaalaha Dowladda 1. 29 ee 1 Abriile 1970: iyo beddelaadii ka dambeeyay:-

Qodobka 12aad

Hayada waxay yeelanaysaa qaab u gaar ah oo lagu soo saari doono Xeer u saxiixo Jaalle Madaxweynaha J.D.S. isaga dhegeystay talada Gudiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dowladda :-

Qodobka 13aad

Maamulka lacagta ee Hayada waxaa xukumaaya laguna maamulaaya habka ay tilmaamayaan Sharciyada Maamulka Lacagta ee Dowladda :-

Qodobka 14aad

Hayada waxay yeelanaysaa Xeer Nidaamiye lagu faahfaahin doono Sharcigan oo soo saari doono Madaxweynaha isagoo dhegeystay talada Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda :-

Qodobka 15aad

Waxaa la buriyay sharci kasta ee ka soo horjeeda sharcigan ama aan la socon karin. Gaar ahaan waxaa la buriyay Qod. 6aad ee Sharciga 1. 19 ee 4 abriile 1978 oo lagu dhisay Guddiga:-

Qodobka 16aad

1) - Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda:-

2) - Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa sharciyada Jamhuriyada Dimuqraadiga ee Soomaaliya :-

Muqdisho, 14 Jen. '79.

MADWEYNAHA J.D.S.  
Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre.

-SHARCI L. 3 ee 14 Jen. 1979 Sharciga Horumarinta Dhulka Daaqa.-

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida laad, 2aad iyo tan 3aad ee Ka-caanka ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkoodu yahay 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1 Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. yahay 15 soona baxay 25kii Janaayo 1969 iyo Sharcigii ka dambeeyey ee lamb. ahaa 68 soona baxay 20kii Oktoobar 1970 kuna saabsan Dhirta, Daaqa & Ugaarta ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga Dhismaha Wakaaladda Daaqa Qaranka ee lambarkiisu yahay 23 soona baxay 16.8.76 ;

ISAGOO TIXGELINAYA : Barnaamijka X.H.K.S. oo ku saabsan daryeelidda dhaqaalaha iyo horumarinta Daaqa ee Xooluhu ku nool yihiin ;

ISAGOO AQOONSAN : Inay lagama maarmaan tahay in la soo habeeyo sharci lagu fulinaayo Maaraynta, Maamulka iyo Hagaajinta iyo waliba ka hortagga Dhulka Nabaad-guuraaya ;

ISAGOO TIXGELINAYA : Talada uu soo jeediyay Wasiirka Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa ;

ISAGOO TIXGELINAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda : -

Qodobka laad

CADDEYN

b) Wasiir : Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

t) Wakaaladda : Waxaa loola jeedaa Wakaaladda Daaqa Qaranka.

j) Maareeyaha Guud : Waxaa loola jeedaa Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Daaqa Qaranka.

x) Iskaashatada : Waxaa loola jeedaa Iskaashatada Xoolaha iyo Daaqa.

kh) Ururka Daaqa iyo Xoolaha : Waxaa loola jeedaa Urur ay doortaan Xoolayda iyo dadweynaha deggan dhulka la xiraayo.



- d) Xoolo : Waxaa lool jeedaa lo', Dameer, Geel, Ido, Riyo, Fardo iyo Ugaar.

Qodobka 2aad

AWOODDA WASIIRKA

1. Wasiirka asagoo kala tashanaya Maareeyaha Guud ee Wakaaladda iyo Madaxda Daaqa ee Gobollada, wuxuu awood u leeyahay inuu ka dhigo meel kasta oo ka mid ah J.D.S. goob laga hirgelinayo horumarinta Daaqa.

2. Wasiirku isagoo dhegeystay talada Maareeyaha Guud ee Wakaaladda, wuxuu awood u leeyahay beddelaadda xuduudka goob daaqeed ee horay loo calaameeyey.

Qodobka 3aad

SEEREYAASHA

1. Wasiirku isagoo dhegeystay talada Maareeyaha Guud ee Wakaaladda iyo soo jeedinta G.X.H.K.S. ee Gobollada, waxaa uu awood u leeyahay inuu ka dhigo meeshuu garto gobol kasta seero:

2. Seeroyaashu waxay noqon karaan noocyada soo socda:
  - b) Seere Xilli (Seasonal Reserve) oo ah mid waqti go'ana la furo, waqti go'ana la xiro sannadkii:
  - t) Seere Talantaali (Rotational Reserve) oo ah seere loo daaqo si talantaali ah:
  - j) Seere abaareed (Famine Reserve) oo ah dhul la seeray waqti dheer oo aan la furi karin ilaa ay baahi weyn jirto;
  - x) Seere joogta ah (Absolute Reserve) oo ah seere si joogta ahaan u xiran looguna tala galay baaris cilmiyeed.

3. Dhulka la xirmeeyo ama la seero waa inuu yeeshaa xuduudo la caddeynaayo lana calaameynaayo.

4. Xiritaanka ama furitaanka seerayaasha: goob kasta waxaa lagu furi karaa oo keliya oggolaansho qoran oo uu bixinaayo Maareeyaha Guud ee Wakaaladda, isagoo la tashanaaya Madaxda Daaqa iyo Xoghayaha X.H.K.S. ee Gobolka.

5. b. Maareeyaha Guud isagoo la tashanaaya Xoghayaha Xisbiga ee Gobolka iyo Xoghayaha Xisbiga ee Degmada wuxuu seere walba ka abuuri karaa Ururro xoolo iyo daaq (Range & Livestock Association).

t. Maareeyaha Guud waxaa awood loo siiyay in haddii urur la sameeyey uu hirgelin waayo hawshii loo abuuray uu baabi'in karo ururkaas.

Qodobka 4aad

Badbaadada dhulka (Rangeland conservation)

1. Wakaaladda mar alaale markii ay la noqoto iney tahay lagama maarmaan iyadoo ujeeddadu tahay dhaqaalaynta ciid-

da ama ka hortagga carro guurka ama la doonaayo in lagu soo celiyo carradii iyo daaqii iyadoo la tashaysa Wasiirka waxay awood uleedahay Xaaraameynta iyo kontoroolka.

- b) Dhulka loo isticmaalayo beeridda ama daaqa.
- t) Dhulka la qodo, ama la geeda qaado.
- j) Dhulka la gubo ama la jaro geedahiisa.
- x) Dhulka loo isticmaalo biyo xireeno, ceelal, waro iyo wabiyada.

kh) Dhulka shubka ah iyo dhulka la xirmeeyey.

2. Marka ay la noqoto Wakaaladda, meel kasta oo dhulka daaqa ka mid ah, oo aan ahayn meel ay ku yaaliin guryo, dukaa mo, guryo la seexo, ama dhul macdan laga baarayo, waxay soo saari kartaa Xeer hoose (Decree) oo ay dhulkaas ku seeri kartaa iyadoo la tashaneysa X.H.K.S. ee Gobolka.

3. Wakaaladdu si ay u kontoroosho dhulkka daaqa lagana faa'iideysto biyaha waxay qaadi kartaa talaabooyinka soo socda

- b) Ilaalinta qararka, dooxyada, waadiyada, jeex-jeexa,
- t) Joojinta iyo kontoroolka carro-guurka (Soil Erosion). ceelasha, biyo-xireenada, barkadaha iyo waraha (Reservoir).

j) Horumarinta daaqa ku yaal dhulka J.D.S., lana keeno baad cusub oo faa'iido u leh xoolaha.

x) Sameynta beero iyo xerooyin lagu abuurto daaq cusub meelaha ku habboon.

kh) Sameynta keyd daaq (Fodder bank).

d) Abuurista Iskaashatooyinka Daaqa iyo Xoolaha (Cooperative Ranch).

r) Sahaminta dhulka

s) Qaadista tiro koob xooladhaqatada iyo Xoolaha

4. Madax kasta oo Wakaaladda ka tirsan awood ayuu u leeyahay inuu geli karo dhul kasta oo ku yaal goobta daaqa marka laga saaro dhulka la deggan yahay :

b) Si uu u hubiyo talaabooyinka loo baahan yahay in la qaado kuna saabsan hagaajinta daaqa iyo keydka.

t) Si uu u hubiyo in dhulka loo isticmaalaayo sidii qorshuhu ahaa, waafaqsan qodobbada sharcigan.

Qodobka 5aad

Iskaashatooyinka Daaqa iyo Xoolaha  
(Cooperative Ranch)

(Cooperative Ranch)

1. Wakaaladdu iyadoo tixgelineysa baahida loo qabo, dhii-ri gelineysa Iskaashatooyinka waxay abuuraysa Iskaashatoo-yin Xoolo iyo Daaq, ka dib markey oggolaato Guddiga X.H.K.S. ee Gobolka iyo Degmada, waxayna qaadaysaa tilaabooyin lagu hirgelinaayo Iskaashatooyinkaas.

2. Wakaaladdu markay dhammeysa talaabooyinka kor lagu sheegay waa inay sahankii dhulka, qorshihii, iyo habkii lagu maamuli lahaa Iskaashatada ay ku dhaqaaqdaa.

3. Wakaaladdu markay dhammeysa qorshaha Iskaashatada, oggolaatana abuuriddeeda waxay sihr isugu yeereysaa xubnaha doonaya inay abuuraan Iskaashatada, waxaana laga doodayaa arrimaha soo socda :-

b) Tilmaanta dhulka beesha iyo xuduudkeeda.

t) Tilmaanta biyaha loogu tala galay beeshaas.

j) Tilmaanta shaqada, dejinta, horumarinta, dhaqaa-leynta iyo wanaajinta beeshaas.

x) Qiyaasta Xoolaha loo oggol yahay inay daaqaan daaqa loogu tala galay.

kh) Dadka ka mid noqon doona beesha iyo xoolohooda.

4. Shirka gudahiisa waxaa lagu dooranayaa Guddi maamul oo ka kooban 5 Xubnood oo uu ka mid yahay Wakiil ka socda Wakaaladda.

5. Go'aannada shirka waxaa lagu gaarayaa aqlabiyadda xubnaha intoda badan (Majority decision).

6. Wakiilka u jooga Wakaaladda meesha laga abuuray Iskaashatada wuxuu awood u leeyahay goynta tirada xoolaha lagu dhigi karo beeshaas isagoo eegaya dhulka intuu qaadi karo.

7. Markay arrimahaasu dhammaadaan waxay Wakaaladdu diiwaan gelineysaa Iskaashatada.

8. Iskaashatada kasta oo la diiwaan geliyay waxay sameysaa xeer u gaar ah iyadoo raacaysa tilmaanta ay bixisa Wakaaladda.

9. Wixii dhul ah oo sharcigan lagu siiyay Iskaashatada waa inaan loo isticmaalin si kale. Hase yeeshee haddii xubnaha Iskaashatadu ay kala tagaan dowladda ayaa la wareegeysa dhulkaas waxayna ka dhigeysaa beerta daaqa iyo xoolaha oo Dowladda (State Ranch).

10. Guddiga maamulka oo la soo doortay wuxuu Iskaashatada ku maamuli doonaa qorshihii iyo siyaasadda ay Wakaa-laddu u soo dejisay, waana inuu ku dadaalaa sidii uu horay ugu dhigi lahaa khayraadka iyo ka faa'iideysiga Iskaashatada.

11. Guddiga Iskaashatadu wuxuu kaloo awood u yeelanayaa :-

1. Dejinta xoola-dhaqatada iyo xoolohooda.
2. Inay gadaan ama soo gataan xoolo, qalab, iyo wax alaale wixii kale oo ay u baahan tahay Iskaashatadu.

12. Guddiga maamulka Iskaashatada isagoo tixgelinaya duruufka jirta oggolaanshaha ka haysta Wakaaladda iyo Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada: wuxuu awood u leeyahay :

1. Wuxuu israacin karaa dhowr Iskaashato si ay u noqdaan Iskaashato keliya oo weyn.
2. Wuxuu Iskaashatada u kala jabin karaan dhowr Iskaashatooyin.

13. Iskaashatooyinka Daaqa iyo Xoolaha waxay u kala qaybsan yihiin noocyada soo socda :-

1. Iskaashatooyin reer guuraaga.
2. Iskaashatooyinka magaalooyinka ama tuulooyinka.
3. Iskaashatooyinka dadka ka baayac-mushtarka Xoolaha.

14. Iskaashato waliba waa inay ugu yaraan ka koobnaataa 25 Qoys. Qoyskuna wuxuu ka kooban yahay nin aafadiisa iyo caruurtiisa ama aan qaar gaarin.

#### Qodobka 7aad

Abuuridda Beeraha Daaqa iyo Xoolaha ee Dawladda  
(State Ranch) iyo kuwa Keydinta Cawska beeraha  
daaqa (Fodder Bank)

1. Wasiirku isagoo dhegeystay ra'yiga Maareeyaha Guud, ayuu oggolaan karaa abuuridda beero daaq iyo Xoolaha ee Dawladda iyo kuwa keydka cawska meelaha hoos ku tilmaan :

- b) Dhulka aan la deganeyn gaar ahaan goobaha dhulka leh duqsiga qaniinka leh (Tse-tse fly).

- t) Meel kasta oo aan qof lahayn ama Iskaashato lahayn ama aan macdan laga baareyn.
  - j) Meel kasta oo dib loo soo barwaaqaynaayo (Rehabilitation).
2. Wasiirku markuu qaato ra'yiga Wakaaladda wuxuu kaloo oggolaan karaa :-
- b) Meel laga beero daaq xooled iyo beeraha kobcinta (Nurseries) meel kasta oo aan qofna lahayn ama aan Iskaashato la siin ama macdan laga qodeyn.
  - t) Meel laga sameeyo tijaabooyin iyo tababar (Research and Demonstration).
3. Go'aannada kor ku tilmaaman waxaa lala socodsiiina. yaa Xoghayaha X.H.K.S.

#### Qodobka 8aad

#### Horumarinta Biyaha

1. Xiika Wakaaladdu wuxuu yahay ilaalinta iyo qorsheyn-ta biyaha loogu tala galay horumarinta Xoolaha iyo daaqa.
2. Wakaaladda Horumarinta Biyaha waxay talo weyddii-san doontaa Wakaaladdan si ay u siiso meelaha loo oggol ya-hay ceelal, barkado iyo biyo-xireen. Sharcigaanu wuxuu saa-meeynayaa oo keliya miyiga mana khuseeyo Biyaha Magaaloo-yinka.
3. Waa in ruqsad loo helaa Barkadaha, Balliyada iyo Wa-rahaha. Haddii la ogaado in Barkadaha, Balliyada, Ceelasha ay nabad-guurinayaan dhulka ku dhow, Wakaaladdu waxay awood u leedahay iney baabi'iso Barkadahaasi ka dib markey oggo-laato Guddida ee X.H.K.S. ee Degmada iyo Gobolka.
4. Ruqsad bixinta waa in la waafajiyaa goobta barkadda, warta, ama ceelka laga sameynaayo, waana iney Barkad kasta u jirtaa tan kale masaafad aan ka yarayn 30 Km., marka laga reebo dhulka daaqa xoolaha laga hirgelinaayo.
5. Barkadaha meel ku wada yaalla waa in aanay ka bad-naa 20 ilaa 25 Barkadood.
6. Wasiirka marka uu la tashado Xafiiska Daaqa Gobolka, Madaxda Gobolka iyo Maareeyaha Guud ee Wakaaladda, wu-xuu baabi'in karaa barkad kasta, war kasta, ceel walba iyo bi-yo xireen kasta, haddii uu ogaado in aanay khuseen danta Um-madda iyo Dalka Dhaqaalihisa.

7. Wakaaladda Horumarinta Biyaha markay ceelasha dhulka Biyiga ah waa inay marka hore Wakaaladda ka heshaa cagobansho inta aanay bilaabin qoditaanka.

Qodobka 9aad

Diiwaan gelinta meelaha biyaha

1. Dhamaan Barkadaha, Waraha, Ceelasha waa in la diiwaan geliyaa iyadoo la siinaayo lambar u gaar ah gobolkiiba.

2. Habka diiwaan gelinta waxaa tilmaami doonta Wakaaladda.

3. Canshuurta diiwaan gelinta waxay noqon doontaa Sh. So. 10/= waxaana la siin doonaa Wakaaladda.

Qodobka 10aad

Abuuridda Sanduuqa lacagta ee Wakaaladda (Range Fund)

1. Si loo dhaqaaleeyo, maamulo loona hirgeliyo horumarinta dhulka daaqa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Wakaaladda waxay u baahan tahay dhaqaale.

2. Dhaqaalahaas wuxuu ka imaan karaa canshuurta ay Wakaaladdu ka heleyso hawla kasta ay qabato oo ah cawska, dhirta iyo wixii ka soo baxa ugaarta iyo ganaaxa amaba lacagta ay ka hesho bankiyada ama deeq shisheeye. Lacagtaa Wakaaladda soo gasha waxaa la waafajinayaa sharciga Xisaa-baadka ee u degsan Wakaaladaha madax-banaan.

Qodobka 11aad

Canshuurta

1. Wakaaladdu waxay canshuur ka qaadaneysaa waxyaalaha hocs ku qoran :-

b) Ruqsadda Cawska (Grass Permit) waxaa laga qaadanayaa

1. Sh.So. 10/= Xamuul baabuur oo ah 3 ilaa 7 tan

2. Sh.So. 20/= Xamuul baabuur oo ah 20 tan iyo wixii ka badan.

3. Sh.So. 00/50 Dameeraha iyo fardaha ama Awrta.

t) Xoolaha ruqsad la'aan ku gala seeayaasha iyo meelaha ujeedada iyo cilmi baarista, waxaana laga qaadayaa sida soo socota :-

1. Geela	Sh. So.	5/—	neefkiiba
2. Lõ	»	3/5	»
3. Ido iyo Riyo	»	1/50	»
4. Dameer iyo Fardo	»	3/50	»

- j) Dhammaan Iskaashatooyinka daaqa iyo Xoolaha marka la diiwaan geliyo waxay bixin doonaan Sh.So. 50/ waxaana lagu soo qori doonaa arji ah Sh.So. 5/=
- x) Ruqsadda barkaduhu waa Sh.So. 50/= marka la dhiisaayo, sannad walbana waxaa laga qaadayaa Sh.So. 5/=; hase yeeshee kuwa aan loogu tala gelin ganacsi waa lacag la'aan.
2. Wakaaladdu ayaa iibin doonta wixii geedo ka baxa beeraha ama daaqa oo lagula wareego Xukun Maxkamadeed ama uu ka cararo qofkii lahaa, waxaana lagu gedi doonaa qandaraas dadweynaha loo soo bandhigo. Wixii lacag ka soo gala waxaa lagu shubaayaa xisaabta Wakaaladda.
3. Wasiirka waxaa awood loo siiyey inuu sicir u goyn karo biyaha waraha iyo ceelasha ee hoos yimaada Wakaaladda.

Qodobka 12aad  
Bixinta Rukhsadda

1. Wasiirka ama qof kasta oo ka wakiil ah ayaa bixin kara Ruqsadda isagoo cuskanaaya shuruudaha ku qoran sharcigan.
2. Wasiirka ama qofka isaga ka wakiil ah, waa baabi'in karaa rukhsadda ama wixii shaki galo, ama ka soo bixi waayo shuruudaha ku qoran sharcigan, ee rukhsadda lagu bixiyey.
3. Qof kasta oo ruqsad la'aan beddela, durkiya ama baabi'iya Calaamadda, ama xuduudka beeraha, ama seereyaasha, dambi ayuu galayaa.

Qodobka 13aad

Awoodda baarista iyo qabashada

Askarta dhiman ee Wakaaladda, seere iyo dhir ilaaliyayaasha, waxa loo xilsaaray ama booliska waxay awood u leeyihiin inay baaraan ama qabtaan qofkii ku xadgudba sharcigan iyagoo isla markiiba horgeeynaya Maxkamadda ku shuqul leh.

Qodobka 14aad

Ciqaab

1. Qof kasta oo ku xadgudba sharcigan wuxuu muteysanayaa in lagu ciqaabo xarig 6 ilaa 9 bilood ah ama ganaax gaaraya Sh.So. 600 ilaa Sh.So. 1200/=
2. Xadgudubkaasu haddii uu ku saabsan yahay maal cilmi baaris loogu tala galay ciqaabtu waxay noqoneysaa xarig ah 6 ilaa hal sano ama ganaax gaarayaa Sh.So. 1000 ilaa Sh.So. 5000/=
3. Qofkii caado ka dhigto inuu ku xadgudbo sharcigan ruqsadda ama oggolaanshaha uu heysto waa laga joojinayaa muddo 4 bilood ah waana laga qaadi karayaa ruqsaddaas.

4. Qof kasta oo qaadan waaya alaabta dembiga lagu galay muddo saddex bilood ah, alaabtaas Dawladda ayaa la wareegeysa.

Qodobka 15aad

Ruqsaddihii iyo oggolaanshihii horey loo bixiyey

Dhammaan rukhsadaha, liisannada, oggolaanshaha, ama dokumentigii ku saabsan Seeraha, Cawska Xoolaha, Geedaha, Beelaha iyo kuwii la bixiyey sharcigan hortii, ee aan sharcigan waafaqsaneyn, qofka ruqsadaha haysta, waa inuu weydiistaa Wakaaladda in ruqsadihiisa loo waafijiyo sida ku qoran Sharcigan muddo lix bilood dhexdiisa.

Qodobka 16aad

Xeer Nidaamiye

Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinayo talada Wasiirka wuxuu soo saari karaa Xeer nidaamiye lagu faahfaahinayo laguna fulinaayo sharcigan.

Qodobka 17aad

Dhaqan gelid

Sharcigan waxaa lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dawladda wuxuuna dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib markii lagu soo saaro faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 4 Febraayo, 1979

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Sax. S/Gaas Maxamed Siyaad Barre



Law No. 3 4th Feb. 79 Decrees this act as range Development and Management act

President of S.D.R.

HAVING SEEN : The 1, 2 and 3 Decree of the Rvolutin.

HAVING SEEN : Law No. 17, 18 and 19 of 1 July 1976.

HAVING SEEN : Law No. 15 of 25 January 1969 and Law No. 68 of 20 October 1970 concerning Forestry and Wildlife.

HAVING SEEN : the Law No. 23 of 16 August 1976 concerning the creation of the National Range Agency.

CONSIDERING : the Policy and Programme of the Party concerning the conservation and development of the range-land.

REALIZING : that it is indispensable to provide an Act the conservation, development and management of the range-land and fight against desertification.

CONSIDERING : the opinion of the Minister of Livestock, Forestry and Range.

CONSIDERING : the decision of the Political Bureau and the Council of Ministers.

#### Article 1

##### Interpretation

MINISTER : Means the Minister of Ministry of Livestock, Forestry and Range.

AGENCY : Means the National Range Agency.

GENERAL MANAGER : Means the General Manager of National Range Agency.

COOPERATIVES : Means Range and Livestock Cooperatives

RANGE & LIVESTOCK ASSOCIATION : Means the Assiation chosen from the community to deal with the conservation and development of the range and livestock.

ANIMALS : Means cattle, sheep, goats, camels, donkeys, horses and wildgame.

#### Article 2

1. The Minister, in consultation with the General Manager,

the Regional and district staff, could declare any area in the Somali Democratic Republic as Range Development Area.

2. The Minister may on the advice of the General Manager or his representative alter the boundary of the development area.

### Article 3

#### Reserves

1. The Minister on the advice of the General Manager and in consultation with Regional Authority can declare any area in the Country as a grazing reserve.

2. The Reserve so declared could be:

- a) Seasonal Grazing Reserve - which is a reserve that closed and opened for specific periods each year.
- b) Rotational Grazing Reserves - this area grazed on rotation basis.
- c) Famine Reserve - which is reserve any area for a long period and opened only in time of hardship.
- d) Absolute Reserve - which is an area closed permanently for flora and fauna study.

3. All reserves or enclosures shall have all its boundaries properly identified and demarcated.

4. Closing and opening of any such area shall only be on the written permission of the General Manager or his delegate on the advice of the Regional Range Director and the Regional authority.

5. a) The General Manager or his representative, in consultation with the Regional Secretary of the Party or district Secretary of the Party, may create Range and Livestock Association for each reserve.
